Dugsiyada Qarnigan 21-aad

Inta badan ardada dhigata dugsiyada Ontaariyo ee Afka Ingiriisiga, Faransiiska iyo kuwa Katooligaba natiijada ay ka helaan imtixaannada way sarreysaa marka la eego dhinaca wax akhriska, qorista iyo xisaabtaba. Laakiin, ma jiraan siyaabo kale oo aynu u qiimeyn karno guusha ay ardadu ka gaarto dugsiyada?

- Haddii aad mala awaasho waxa uu yahay dugsiga ugu wacan ama ugu wanaagsan ee jiri kara, sidee buu u eg yahay bay kula tahay?
- Dugsiyo noocee ah baynu u baahannahay qarnigan 21-aad?
- Barnaamijyo iyo tashiilaad noocee ah baa habboon in laga heli karo dugsi kasta?

Soo booqo shabakaddeenna internetka si aad uga bogoto ololaheenna ku aaddan Dib u mala awaalidda (dib uga fikirka) Dugisiyadeenna ka dhexeeya ummadda oo dhan ee qarnigan 21-aad.
www.peopleforeducation.com

Ururka Dadka u istaagey Waxbarashada Ummadda ka Dhexeysa (People for Education) wuu na caawin karaa

Si aad uga bogatid:

- Yaa gaadha oo sameeya go'aannada dhinaca dhaqaalaha iyo siyaasadda dugsiyada lagu wado.
- U diyaarinta ilmahaaga in uu billaabo Dugisiga Xannaanada Carruurta.
- In aad ilmahaaga ku caawiso in uu guul ka gaadho dugsiga.
- Sida ay u shaqeyso waxbarista gaarka ah.
- Sida aad u xallin karto duruufaha aad kala kulanto dugsiga.
- Imtixaamka gobalka Ontario (EQAO), Kulanka waalidka iyo macallinka iyo ikhtiyaarka ay ardada dugsiga sare haysato.
- Ururuka Dadka u taagan waxbarashada (the People for Education Network).

Nagala soo xiriir **1-888-534-3944** (Toronto naga soo wac 416-534-0100) ama booqo shabakadda internetkeenna. Waxaad halkaas ka heli war ku qoran afaf badan oo kala duwan oo ku saabsan Waxbarashada.

Kuma ayaannu nahay?

Ururkan Dadka u taagan Waxbarashada waa mid madax bannaan oo ay waalidiini hagto. Waa urur ku howlan in uu kobciyo waxbarashada ummadda ka dhexeysa ee dugsiyada Ontaario ee Ingiriiska, Faransiiska iyo kuwa Katooligaba.

Tan iyo sanadkii 1997-dii Ururkani wuxuu ku howlanaa in uu taageero waxbarashada ummadda ka dhexeysa isagoo ku dadaaley in uu:

- Daraasado sameeyo.
- Ummadda uu kala hadlo waxbarashada.
- Bixiyo tashiilaad iyo taageero ku aaddan waalidiinta Ontaariyo oo dhan.

Waxaannu isku xirnaa dugsiyada iyo waalidka innagoo adeegsaneyno xumno fir fircoon oo isku xiran, iimeyl, shirar sanadla ah iyo warside joogto ah.

Waxaa na taageero dhaqaale aynu ka helno mu'assasooyinka, ganacsatada iyo Wasaaradda Waxbarashada ee Ontaariyo iyo taageerada deeqsinnimada leh ee aynu ka helno xubnaha bulshada iyo guddiyada dugsiyada.
Si aad xogtayada uga bogoto, si aad u hesho tashiilaad caawiya bulshadaada ama haddii aad dooneyso in aad xubin ka noqoto ururkan, fadlan booqo cinwankan: www.peopleforeducation.com

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

P.O. Box 64
Station P
Toronto M5S 2S6
www.peopleforeducation.com
info@peopleforeducation.com

People for Education is a registered charity: #85719 0532 RR0001
Printed on 100% recycled paper.

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Dheeho Dugsiyada Ontaariyo

2007

Waxbarashadu waa shey muhiim ah, maxaa yeeley waxay taabaneysaa qayb kasta oo ka mid aha mustaqbalka ilma walba: Fusaddooda guul ahaan, ammaankooda, caafimaadkooda, noloshooda guud ahaan iyo muwaadinnimadooda.

Urur ahaan haddeynu nahay People for Education, waxaynu rumeysannahay in dugsiyo ay dowladdu si xoog leh u taageerto oo ay ka baxaan barnaamijyo tiro badan ay yihiin waxa siin karo dhammaan ardada fursad ay ku gadhaan Horumar intii karaan kood ah –iyadoon lagu shardin Afka, dhaqaalaha, gurigey haystaan, jinsiyadda iyo diinta ay haystaan.

Sanad walba ururkan People for Education wuxuu daabacaa warbixin ku saabsan Dugsiyada Ontaariyo ee ay dowladdu lacagaha ku bixisao.

Si ay loola socdo barnaamijyada iyo tashiilaadka laga heli karo dugsiyada Ontaario, Ururkan People for Education wuxuu Su'aalo-side u diraa guddiyada dugsiyada iyo maamulayaasha dhamman dugsiyada Ingiriiska, Faransiiska iyo Katooligga ha ahaadeen dugsi hoose ama sare ee dhamman gobalkan Ontaariyo.
Macluumaadka ku qoran warqaddan wuxuu ka yimid su'aal-sidahaas kor ku xusan iyo wasaaradda waxbarashada, Guddiga Barashada ee Kanada iyo OECD.

Si aad u daalacatoWarbixintii dugsiyada Ontaariyo oo buuxdo ee 2007-da, iyo in aad hesho xog dheeri ah oo ku aaddan dugsiyada iyo macluumaad caawin kara waalidiinta oo ku qoran afaf badan oo kala geddisan , Booqo Shaashadda internetka ee:
www.peopleforeducation.com

Maxaa si wacan u shaqeynaya?

Natiijada imtixaanka iyo cadadka qalinjabinaya:

- 90% Ardada dugsiyada Hoose ee Ontaariyo way gudbeen imtixaamka gobalka ee fasalka 3-aad iyo 6-aad ee dhinaca akhriska, qorista iyo xisaabta
- Ontaario waa kaalinta seddexaad marka la eego hooseynta ardada dugsiyada ka cararta iyagoon dhammeysan.
- Carruurta 15 jirka ah ee Kanada waa kaalinta seddexaad marka la eego natiijada isku cel-celis ee imtixaannada caalamiga ah ee akhriska marka la eego waddamada la isku yiraa OECD, Ontaariyana waxat ja sarreysaa cel-celiska Kanada.
- Ontaariyo waa kaalinta koobaad marka la eego inta ruux ee da'adoodu u dhexeyso 25 to 64 ee dhammeeyey waxbarasho jaamacadeed.

Tirada ardada ee fasalka

- Tirada ardada ee fasal ku jiri karta oo la yareeyey-58% ardada Fasalka Xannaanada ilaa fasalka seddexaad waxaa fasalkii dhigta 20 ardey ama ka yar. Iyo 98% ardada oo dhigata fasal ah 25 ardey ama ka yar.

Ciyaaraha (physical education)

- 41% ardadada dugsiyada hoose waxay leeyihiin macallin cayaarta bara taas oo ah horumar la gaadhey tan iyo sanadkii tegey.

Maamulayaasha

- 89% dugsiyada hoose iyo 97% dugsiyada sare waxay haystaan maamule si buuxda uga shaqeeya.

Dhismaha dugsiyada

- 56% dhammaan dugsiyadau waxey heleen dayactir ama dib u habeen sanadkan.

Maxaa u baahan in wax laga qabto?

Taageerada dadka dalka ku cusub

- Tan iyo sanadkii 2000, 23% waxaa hoos u dhac lagu sameeyey saamiga dugsiyada hoose ay ku helaan macallimiin afka Ingiriiska dhigta. Isla waqtigaas waxaa jirey 29% korodh ah oo ay kordheen saamiga dugsiyada ay dhigtaan ardada loo yaqaan ESL ama dhigta afka Ingiriiska luuqad labaad ahaan.

Macallimiinta Muusiqada

- 46% dugsiyada hoose waxay leeyihiin macallin muusiqada dhiga. Taas oo ah koradh marka la eego seddexdii sano ee la soo dhaafey, laakiin saamigani wuxuu aad uga hooseeyaa kii 1997-dii goortaas oo 58% dugsiyadu lahaayeen macallimiin muusiqo.

Maktabadaha

- Kaliya 57% Dugsiyada hoose ee Ontaariyo ayaa leh macallin Maktabad marka la bar bar dhigo 80% ay lahaan jireen 1997/98-dii.
- Dugsiyada Sarena, 73% ayaa leh Macallin Maktabadeed marka la bar bar dhigo 78% ee sanadihii 2000/01.

Waxbarista gaarka ah

- Dugsiyada hoose, isku cel celis cadadka ardada ku jirto barnaamijka waxbarista gaarka ah iyo tirada macallimiinta waxbarista gaarka ah waa 30.4 ardeyba in uu ku soo aado 1 macallin taas oo dhaanto sidey aheyd sanadkii tegey, laakiin aad uga sarreysa sanadihii 2000/01, goortaas oo cadadku uu ahaa 22.4 ardeyba in uu ku soo aado 1 macallin.
- Dugsiyda sare iyagu isku cel celis waa sidan: halkii macallin wuxuu u dhigaa 51.2 ardey

Qaaraan aruurinta iyo dhaqaalaha yaree dugsiga la iska qaado

- Sanadkii 2005/06, Dugsiyada gobalka oo dhan waxay soo uruuriyeen qaaran dhan $576 million. Qaaraankaas oo ka kala yimid dhaqaale yaree dugsiyadu qaadaan iyo mashiinnada cabbitaanka iibsha.